

Ogow DHAMMAAN faa'iidooyinkaaga



Diiradda la saarayo: Faa'iidooyinka iyo adeegyada farmashiyaha

Xubnaheenu waxay ku tiirsan yihiin daawooyin si u helaan oo ugu sugnaadaan caafimaad. **Taasi waa sababta aanu lacagtooda u bixino daawooyinka la isku qoro oo badan.** Waxaanu rabnaa in aanu xaqiijino in aad haysato daawooyinka aad u baahan tahay. Haddii aad si degdeg ah ugu baahan tahay daawo aan caymiskeeda la bixinin, waxaad Adeega Macmiilka ka wacdaa **800-224-4840 ama TTY 711.**

Daawooyinka caymiskooda la bixiyo

Daawooyinka la isku qoro intooda badan ayaa lacagtooda lagu bixiyaa caymiska daawada ee Medicaid, laakiin dhamaantood maaha sidaasi.

Buuga daawooyinka la oggol yahay "formulary" oo muujinaya daawooyinka aanu caymiskooda bixino. Marka adeeg bixiyahaagu uu qoro daawo, weydii in ay ka tiirsan tahay liiska daawooyinka la oggol yahay "formulary" ee CareOregon.



Xaddidnaanta daawooyinka la isku qoro

Daawooyikani ma aha kuwo caymiskooda la bixinayo:



- ▶ Daawooyinku kuma jiraan liiskayaga daawooyinka la oggol yahay "formulary"
- ▶ Daawooyinka lagu daaweeyo xaaladdaha caafimaadka ee uusan caymiskooda bixin Qorshaha Caafimaadka Oregon.
- ▶ Daawooyinka loogu talagalay ujeedooyin dhanka is qurxinta/wax ka beddelka jirka 'cosmetic'.
- ▶ Daawooyinka aysan oggolaanin FDA.
- ▶ Daawooyinka aan loo oggolaanin xaaladaada.

Xaddidaadaha kale:

- ▶ Waxaa dhici karta in aad hesho daawooyinka guud oo aan ka ahayn daawooyinka magaca leh 'name-brand'.
- ▶ Waxaa dhici karta in aad marka hore isku daydo daawooyinka kale (oo sidoo kale loo yaqaano daaweynta 'step therapy').
- ▶ Waxaa dhici karta in daawada la xaddido da'ahaan.
- ▶ Waxaa dhici karta in daawada yeelato tiro xaddidan.
- ▶ Daawada laguu qoro waxaa dhici karta in la iskaga baahdo oggolaansho hore.
- ▶ Farmashiyahaagu wuxuu u baahnaan doonaa in uu biilka daawooyinka la isku qoro ee caafimaadka dhimirka toos ugu diro OHA.



Dib u buuxinta daawooyinka

Daawooyinka la isku qoro intooda badan waxay ku kooban yihiin **31 maalmood ama ka yar.** Iyada oo loogu talagalay daawooyinka intooda badan, taariikhda ugu horreysa ee aad dib u buuxsan karto waa 23 maalmood ka dib markii aad dib u buuxsatay daawadii lagu qoro ee uu dambaysay. Waxaanu buuxinaa daawooyinka la isku qoro oo dhan 90-maalmood oo loogu talagalay daawooyinka lagu daaweeyo cudurada raaga.



Faa'iidooyinka farmashiyahaaga waxaa ka mid ah:

- ▶ Dib ula eegista daawooyinka ee farmashiistaha si loo xaqiijiyo in ay si fiican iskula falgalaan.
- ▶ Daawooyinka meel kasta laga iibsano karo 'over the counter' qaarkood, marka aad haysato daawo la isku qoray.

Su'aalaha?

Waxaad wacdaa adeeg bixiyahaaga su'aalaha ku saabsan dib u buuxinta daawooyinka, helitaanka oggolaansho hore ama hadii laguu diido adiga oo jooga farmashiyaha. Haddii aad hayso wax su'aalo ah oo kale, Adeega Macmiilka ee CareOregon ka wac 800-224-4840 ama TTY 711 ama farriin ammaan ah noogu soo dir careoregon.org/portal

Wax ka ogow CareOregon

Faa'iidooyinka adeegyada farmashiyaha waxaa caymiskooda daboolaa CareOregon, qorshahaaga caafimaadka Medicaid. Halkan ka ogow waxyaabo badan oo nagu saabsan.

Marka ay dadku ka hadlaan Medicaid ka jirta Oregon, waxaa dhici karta in aad maqasho iyaga oo dhahaya magacyo iyo warqado badan oo kala duwan. Sababtu waa in ay jiraan ururo badan oo ku lug leh xaqijinta in aad hesho daryeelka aad u qalanto. Sidee baad macne ugu yeeli kartaa haba yaraatee?

Waxay gacan ka geysataa in aad uga fikirto Medicaid ka jirta Oregon in ay tahay sida qaabka pyramid oo kale.

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa gacanta ku haya barnaamijka Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).



Health Share of Oregon (HSO) waa waxa loo yaqaano daryeelka ururadu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban.



CareOregon waa mid ka mid ah dhowr bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya n ay bixiso daryeel. Waxaan sidoo kale gacan ka geysanaa faa'iidooyinka adeegyada farmashiyaha ee loogu talagalay xubnaheena.



Waxaa jira farmashiyayaal badan oo ka tirsan nidaamka CareOregon. Nidaamkeena waxaa ku jira inta badan farmashiyayaasha ganacsiga iyo kuwa badan oo ah dukaamada daawada ee madaxa banaan. Waxaan sidoo kale bixinaa kala doorashada daawada boosta lagu dalbado. Farmashiye ka hel nidaamkeena careoregon.org/find-a-provider



CareOregon waxay bixisaa adeegyada kuwan oo kale ah ee loogu talagalay xubnaha Medicaid (OHP):

- ▶ Daryeelka caafimaadka jirka
- ▶ Daryeelka caafimaadka dhimirka
- ▶ Isticmaalka mukhaadaraadka
- ▶ Daryeelka ilkaha
- ▶ Medicare la sii marayo CareOregon Advantage
- ▶ Daryeelka bukaanka hospice ama daaweynta oo la adeegsanayo Bixiyayaasha Housecall

Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad isticmaasho adeegyo muhiim ah sida kuwani oo kale:

- ▶ Isku duwida daryeelka
- ▶ Farmashiyaha
- ▶ Daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhallaanka
- ▶ Kala doorashada gaadiidka
- ▶ Adeegyada turjumaada luqadda
- ▶ ER iyo daryeelka degdega ah

Waxaad heli kartaa tani oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadani waa lacag la'aan ah. Wac 800-224-4840 ama TTY 711.